## Barnaamijka Dugsiga Hortii iyo Luuqadda ee Ontario

Barnaamijka Dugsiga Hortii iyo Luuqadda ee Ontario waxa uu siiyaa caruurta adeegyo tan iyo marka ay dhashaan ilaa ay ka bilaabaan dugsiyada. Qiimayn iyo adeegyo daaweyn kala heer ah ayaa la siiyaa caruurta iyo qoysaskooda ku dhaqan gobolka ee ah jaaliyado kala duwan oo gurigaaga ku dhaw ilaa xad.

Haddii aad wax ka qabto hadalka iyo xirfad luuqad barashada ilmahaaga waxaad caawimaad ka heli kartaa Barnaamijka Dugsiga Hortii iyo Luuqadda ee Ontario. Shaqaalaha Barnaamijka ayaa ku bari kara sidii aad ilmahaaga kaga caawin lahayd afbarashada, si aad usiiso isaga ama iyada fursadda ugu wanaagsan ee kor uqaadidda caafimaad.

Barnaamijka Dugsiga Hortii iyo Luuqadda ee Ontario waxay ku bixiyaan adeegyadooda lacag la'aan kaagamana baahna in uu dhakhtar kuu soo diro.

Caawimiddu marna ma ahan wax lala deg degay.

Faahfaahin dheeri ah kala xiriir Barnaamijka Dugsiga Hortii iyo Luuqadda ee Ontario ama wac Dawladda Ontario INF khadka taagan ee lambarkiisu hoos yahay.

Faahfaahin dheeri ah kala xiriir:

ServiceOntario
1-866-821-7770
TTY 1-800-387-5559
www.ontario.ca/children

Si aad u dalbato nuskhado dheeri ah, gal shabakada:

www.serviceontario.ca/publications

ama wac

1-800-668-9938
TTY 1-800-268-7095

SOMALI
Oct. 2009 © Queen's Printer for Ontario, 2009

**BARNAAMIJKA DUGSIGA HORTII IYO LUUQADDA EE ONTARIO. (PRESCHOOL SPEECH AND LANGUAGE PROGRAM)**



# Hadal iyo Xirfad Luuqad Barashada Ilmaaga Laga Bilaabo Dhalasho ilaa 30 Bilood

Ontario



Laga soo bilaabo marka ay dhashaan ilmuhu waxay bilaabaan hadaaq ama wada hadal. Mar hore oo yaraantooda ah ayey fahmaan waxa aad sheegayso, iskuna taxallujiyaan in ay cod iskood ah sameeyaan. Waxay bilaabayaan in ay sameeyaan hadal iyo xirfad luuqadeed taas oo ku caawinaysa saaxiib yeelashada iyo sida wax loo akhriyo, iyo in ay dib dambe ku guulaystaan dugsiga iyo noloshoodaba. Xirfadaha wada hadalku waa ku xasaasi guusha mustaqbalka ilmahaaga.

Ku dhawaad 10 kiiba hal ka mid ah caruurta ayaa u baahan in laga caawiyo afbarashada iyo xirfadaha luuqadda. La'aanta caawintaasi waxay dirqi kaga dhigaysaa in ay wax maqlaan iyo in ay hadlaan, wayna ku adkaanaysaa in ay wax akhriyaan, iyo in ay caruur kale la cayaaraan.



# Aas-aaska horumarineed

Aas aasyadaan horumarineed waxay ku tusinayaan qaar ka mid ah xirfadaha hoosta ka xariiqa horukaca curuurta yar yar intay baranayaan wada hadalka. Waxaa kale oo jira wax xoogaa naseexo ah oo ku saabsan sidii aad u caawin lahayd cunugggaaga in uu kordhiyo hadalkiisa iyo xirfadda luuqaddiisa. Haddii uusan ilmahaagu lahayn mid ama in ka badan ee asaasigaan ah, fadlan la xiriir Barnaamijka Dugsi-hortii Hadal iyo Luuqad ee xaafaddaada.



## Markuu yahay 6 bilood

- Wuxuu jalleecaa halka ay shanqartu ka imaanayso
- Waxa uu bilaabaa cod dheer ugu jawaabid jabaqdii yeertaba
- Waxa uu sameeyaa oohinno dhawaaqyo kala duwan ah had – ba waxa uu tabanahayo–waan baahanahay, waan daallanahay
- Waxa uu eeganayaa wejigaaga marka aad hadlayso
- Waxa uu sameeyaa dhoolla cadayn iyo qosol si uu uga jawaabo dhoolla cadayntaada iyo qosolkaaga
- Waxa uu iska dhigaa sidii uu qufacahayo ama cod kale samaynahayo – *iih ,ixii, aah*

## Markuu yahay 9 bilood

- Waxa uu ka jawaab bixiyaa magaciisa/eeda
- Waxa uu jawaab ka bixiyaa soo dhicitaanka telifoonka ama albaabka la soo garaaco
- Waxa uu fahmaa in lagu yiri "maya"
- helayaa waxa uu/ay rabo/rabto qaab cod ama ishaaro ah, sida in la gaaro si loo qaado
- Waxa uu kula cayaaraa dheyello, tusaale, isii–hoo–qaado
- Waxa uu ku raaxaystaa aga joogga dadka
- Waxa uu bilaabaa hadaaq iyo cod ku celcelin – *baabah daa dah*

## Markuu yahay 12 bilood

- Waxa uu raacaa jihada hal tallaabo oo fudud – "fariiso"
- Waxa uu qolka daafihiisa ka eegaa bal wax aad u tilmaanto
- Waxa uu istcimaalaa labo ama saddex eray
- Waxa uu isticmaalaa tilmaan muuqaaleed si uu wada hadal u sameeyo–waxa uu u gacan ruxaa "nabadeey", madaxa ayuu rux ruxaa "maya"
- Waxa uu dareenkaaga ku soo jiitaa cod, tilmaan muuqaaleed, iyo far ku fiiqid isaga oo indhahaaga eegaya
- Waxa uu kuu keenaa lucbad (Alaabo alaabeey ama Qalab caruureed) si uu kuu tusiyo
- Waxun ficil ah ayuu ku "dhaqaajiyaa" si loo soo eego ama loo amaano isaga
- Waxa uu isku dar daraa codad fara badan sidii isaga oo hadlaya – *adaa adaa badaah aabbo*
- Waxa uu tusiyaa in uu rabo buug masawireed fudud

## Ilmuhu way ka helaan marka aad:

- Hoos ugu soo daa degto si ay wejigaaga u arkaan. Tani waxay u sheegaysaa in aad xiisaynayso waxay samaynayaan iyo waxay dhahayaan. Waxay sahlaysaa is dhex galka labadiina.
- Ku cel celi codka ay sameeyaan. Ilmuhu way ku raaxaystaan cod samaynta, wayna ka helaan marka aad iyaga iska dhig dhigto adiga oo ku cel celinaya.
- Hees oo qosol, weliba marka aad quudinayso, u qubaynayso, ama aad dharka ka badelayso. Xusuusnow in aad kala hadasho ilmahaaga waxa aad samayso ama aragto maalintaas oo dhan – "Hooyo Jaakadeedii bay gashanaysaa", "Kaasi waa Gaari weyn".
- U sheeg magacyada wayaalaha ay arkayaan ama ku cayaarayaan. Ilmuhu waxay xiiseeyaan in ay waxyaalo cusub sahmiyaan ama bartaan, waxayna ka helaan in ay maqlaan waxa shey kaste lagu magacaabo.

## Markuu yahay 18 bilood

- Waxa uu fahmaa ujeeddada "soo gal iyo sii bax" "demi iyo daar"
- Waxa uu tilmaama dhawr xubnood oo jirka ka mid ah marka la weydiiyo
- Waxa uu isticmaalaa ugu yaraan 20 eray
- Waxa uu uga jawaabaa erayo ama tilmaan muuqaaleed su'aalaha fud fudud – "meeyey Boonbalihii?", "waa maxay waxaasi?"
- Waxa uu ku sameeyaa Boonbalaha  qaybo cayaaro iska yeel ah – Boonbalaha ayuu biyo waraabiyaa
- Waxa uu sameeyaa ugu yaraan afar xaraf oo codad kala duwan ah – *b, n, d, g, w, h*
- Waxa uu ku raaxaystaa in wax lagu dul akhriyo wuxuuna kula fiirsadaa buugaagta fudud
- Waxa uu tilmaamaa masawirada isaga oo isticmaalaya hal far

## Markuu yahay 24 bilood

- Waxa uu raacaa jihooyin labo tallaabo ah – "Orod oo keen Boonbalahaagii, xambaar oo tusi Ayeeyadaa"
- Waxa uu isticmaalaa 100 eray ama in ka badan
- Waxa uu isticmaalaa ugu yaraan labo magac–u–yaal– "adiga", "aniga", "waxayga"
- Waxa uu si is daba joog ah hal jumlad oo gaaban isugu keenaa labo eray ama in ka badan – "Aabbe koofi", "Gaari hoos aad"
- Waxa uu ku raaxaystaa la joogitaanka caruuro kale
- Waxa uu bilaabaa in uu boonbalayaal u hibeeyo saaxiibadiisa kuna daydo ficillada iyo erayada ilmaha kale
- Dadku waxay fahmaan erayadiisa 50 ilaa 60 boqolkiiba markaas
- Si fudud oo uusan isku dhibayn ayuu u sameeyaa erayada iyo codadka
- Si habboon ayuu buugaagta u qabsadaa boggagoodana u rog rogaa
- Waxa uu "akhriyaa" sawirada xayawaanada iyo qalab caruureedyada
- Qalin qoriga ayuu ku xar xariiqaa

## Markuu yahay 30 bilood

- Waxa uu gartaa uujeedada cabbirka (weyn/yar) iyo tirinta (wax yar, wax badan, ka sii badan)
- Waxa uu istcimaalaa qaar ka mid ah naxwaha dadka waa weyn – "labo bur–saliid", "shimbir duulaysa", "waan booday"
- Waxa uu istcimaalaa in ka badan 350 eray
- Waxa uu istcimaalaa eray ficileedyo – carar, candhuuf, dhac
- Waxa uu bilaabaa u yara wareegid xagga caruuraha kale, isaga oo adeegsanaya lucbado iyo erayo labadaba
- Waxa uu muujiyaa dareen danqasho marka ilmo kale la waxyeelleeyo ama uu calool xumaado
- Waxa uu isku dar daraa dhawr ficil marka uu cayaarayo – quudiyaa lucbadda oo hadana seexiyaa; intuu sheeyaal qot–qotomiyo ayuu hadana wax uu gaari ahaan ka wado marsiiyaa oo kala daadiyaa
- Intuusan hadalku afkiisa ka soo bixin ayuu codad kale sameeyaa
- Waxa uu soo saaraa erayo laban–laama labo jeer ama in ka badan ama uu ku xajinahayo – "daah – inyow – hoo", "sa – riir –, "tu – faax"
- Waxa uu aqoonsadaa shaxda calaamadaha uu horay u soo arkay – aargada McDonald's ee dahabiga ah, calaamadda joogsiga
- Waxa uu xusuustaa ama fahmaa sheekooyinka uu horay u maqlay

## Saan–qaadku waxa ay ka helaan marka aad:

- U deyso in ay taabtaan oo soo qabsadaan buugaagta adigoo u tilmaamaya magacaabayana masawirada.
- U isticmaal erayo dhab ah halkii eray caruureedka – "I sii", baddelkii titii ama "quraarad" baddelkii curaarad.
- Qaado waqti aad iyaga ku dhegaysato–waxay rabaan in aad maqashid codadkooda, erayadooda, iyo fikradahooda cusub oo dhan.
- Sii tilmaamo fudud oo ay raacaan – "Orod oo soo hel kabahaagii guduudnaa".
- Isticmaal erayo badan oo kala duwan markaad la hadlayso–erayo iska soo hor jeeda sida kor/hoos, gudaha/bannaanka; eray ficileedyo sida "cararahaya", "sayrinahaya", iyo eray tilmaameedyo sida "farxad", "weyn", "yar", "nadiif", "wasakh".
- Ku dhiiri geli in ay la dheelaan caruur kale – maktabadda akhriska, kooxo la cayaarid, jardiinada.